

Maxaa Jaamacadda Nugaal U qabsomey Guud ahaan,

Gaar ahaan sanad dugsiyeedkii tagey: Waa maxay qorshaha dhow iyo kan fog? Horudhac



Iyadoo fekerka iyo riyadii aasaaska jaamacadda Nugaal ay ahayd 1999. Iyadoo furitaanka jaamacaddu uu aha iskaashi dhex marey waxgaradka deegaanka iyo qurba joogta u dhalatey deegaanka. Iyadoo 11 sano ay ka soo wareegtey dhagax dhiggii iyo furitaankii jaamacadda Nugaal ee magaalada Lasanod, gobalka Sool. Ayaa waxa is xusuusin mudan in Jaamacaddu ay soo martey marxalado ama heerar kala

duwan. Waxa sidoo kale xusuus mudan in deegaanka Jaamacaddu ku taal ay ku geedaamin yihiin duruufo siyaasadeed, dhaqan dhaqaale iyo kuwa bulsho intaba.

Si kastaba ha ahaatee, waxa Alle mahadiis ah in jaamacadda Nugaal oo ay si wadajir ah uga hawl-galaan hormuudna ka yihiin waalidiinta, ardayda dhigata jaamacadda, kuwa ka baxay, macalimiin iyo maamul isla markaana haysata taageerada bulshada gudaha iyo dibadaba. Taasi waxay keentey in maanta Jaamacaddu marayso marxlad wanaagsan oo qofkasta oo jecel danta guud ee deegaanka SSC uu ku faani karo.

Shaki ma leh oo wax bani aadam gacanta ku hayo gaabis iyo dal dalool lagama waayayo, sidoo kale waxan meesha ka madhnayn duruufo deegaanka u gaar ah iyo iyadoo beesha caalamku (International communities), ay ku calaamadisey deegaanka waxa loogu yeedho meel laysku haysto (Disputed area). Sidaas daraadeed, waxan qoraalkan kooban ku xusi doonaa waxyaabihii inoo qabsomey sanadkii tagey guud ahaan iyo waxyaabaha inoo qorsheysan sanadkan aynu ku jiro.



Waxyaabaha inoo Qabsoomey Guud ahaan

NUGAAL UNIVERSITY
What you seek is what we provide
EDUCATION, LEARNING AND RESEARCH IN EXCELLENCE
Academic Year 2014/2015
Admission is open until 30 Sept. 2014 Time: 8:00Am-12:15am 4:00pm 7:00pm
Place: New Campus, Office Registration Behind Masjid Jama
Available Degree
1. Business Administration
2. Computer Science
3. Sharia & Islamic Studies
4. Community Development & Leadership
5. Education
6. Clinical Officers
7. Public Health
8. Agri-Veterinary
9. Economic & Political Science
10. Nursing
11. Arabic Language
Diploma Programs
1. English Language
2. Arabic Language
3. Basic Business Administration
4. Computer Driving License
New Intake
Admission Requirements
✓ Secondary Education with a Minimum Grade of 'C'
✓ General Application Form
✓ Registration fee \$20 (not refundable)
✓ Applicants Must Provide Two Pictures
✓ Applicant Must be Ready to Sign The NU Code of Conduct

Waxyaabaha inoo qabsoomey waxa ka mid ah ama ugu mugweyn:

- 1) In jaamacadda Nugaal ay hirgeliyey sideed kuliyaadood, isla markaana laga qaato 11 takhasus (degree)
- 2) In jaamacaddu ka hawl-gasho 3 xarumood (campus)
- 3) In jaamacadda ay ka qalin jebiyeen arday gaadheysa 730 oo isagu jira diploma and degree
- 4) In jaamacadda ay dhigtaan arday gaadheysa 730 kuna kala jirakulliyadaha kala duwan ee jaamacadda
- 5) In jaamacadda ay ka hawl-galaan shaqaale ku dhow 100 kana tirsan qabaha kala duwan ee jaamacadda
- 6) In jaamacaddu leedahay naadiyo kala duwan oo laf dhabar u ah jaamacadda sida, midowga ardayda (NUSU), naadiga deeqaha waxbarashada(NUSGET), naadiga teknoolajiyadda (ICT Club), naadiga kubbadda cagta (Foot ball club), iwm
- 7) Sidoo kale kulliyad waliba waxay gaar u leedahay gudi hoosyaadyo firfircoon oo ku hawlan ka warqabida iyo kor u qaadida arimaha ardayda iyo macalimiinta ee kulliyadda ay ka tirsan yihiin
- 8) Jaamacadda waxa u hirgaley magacaabida hormuudyo u gaar ah oo ay leedahay kulliyad weliba iyo xafiis uu ka hawl-galo hormuud weliba.
- 9) Jaamacaddu waxay abuurtey tayadeedana kor u soo qaadey xafiiska manaa'ijta iyo imtixaanaadka oo shaqadiisa u fuliya sidii loogu talo galay
- 10) Jaamacaddu waxay abuurtey xafiiska waaxda cilmi baadhista iyo daraasaadka oo loogu talo galey iney ka hawl-galaan dhammaan, ardeyda macalimiinta iyo maamulka jaamacaddu.
- 11) Jaamacadda waxa u suurageley dhismaha website jaamacaddu leedahay iyo E-learning.
- 12) Dhismaha webka iyo E-learning waxa iska kaashadey ardayda ICT Club guud ahaan, gaar ahaan macalim Shaafici Cabdi iyo Faxdi C/raxmaan oo galiyey maskax iyo maal badan, waxadna ka booqan kartaa www.nugaaluniversity.edu.so, meel kasta oo aduunka aad joogtid waxaad awood u leedahay in aad ka mid noqotid arday wax ka barta Jaamacadda Nugaal. qalin jabi adoo qoyskaaga la jooga.



- 13) Gudiga ardayda kulliyadda horumarinta, arimaha bulshada iyo hogaanka wanaagsan waxay sanadkan jaamacadda ku soo kordhiyeen, board tilmaamaya wajahada



jaamacaddu ku taal iyo dhir beerid muujinaysa bilicda deegaanka iyo jaamacadda.

- 14) Waxa si joogta ah u qabsooma fadhigada hawl-wadeenada jaamacadda (senate of the University), si mar walba looga arinsado loona hormariyo tayada jaamacadda.

15) Jaamacaddu waxay taageero qalabka waxbarashada iyo deeq waxbarasho ka heshaa hay'ada Hass Foundation oo xarunteeda weyn ku taal wadamada Emarites iyo Kenya.

- 16) Jaamacadda Nugaal waxay ka mid tahay daladda waxbarashada sare ee ay ku ba'hoobeen jaamacadaha Somaliya loona yaqaan Somali Research Education Network (SomaliREN)

- 17) Jaamacaddu waxay saaxiibtinimo (Partnership) iyo wada shaqayn la leedahay machadka cilmi baadhista arimaha dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada ee geeska Africa (HESPI) oo xaruntiisa weyn tahay Adisaba.

- 18) Jaamacaddu waxay saaxiibtimo (Partnership) iyo wada shaqayn la leedahay, machadka cilmi baadhista dhaqanka iyo siyaasadda ee loo yaqaan heritage institute for policy makers (HIP) oo xaruntiisa weyn ku taal Muqdishu.

- 19) Jaamacaddu waxay xidhiidh la leedahay jaamacado sumcad sare leh ku leh wadanka gudahiisa iyo dibadiisaba.

- 20) Iyadoo jaamacaddu ay taageero ka helayso hay'ado caalami ah, waxay jaamacaddu ka mid tahay jaamacadaha bixiya tababarada macalimiinta ee heer hoose dhexe iyo sare (secondary).



- 21) Jaamacaddu waxay iskaashi dhow iyo wada shaqayn la leedahay, hay'ada magaceedu yahay Tropical Health Education Trust (THET) oo ah hay'ad laga leeyahay wadanka UK, kana shaqaysa arimaha caafimaadka iyo tababarada macalimiinta waaxda caafimaadka.

Sanad Dugsiyeedkii Tagey

Haddaan intaas ku soo koobno mar xaladda guud ee jaamacadda. Waxa iyana xusid mudan ineynu wax ka iftiimino waxyaabihii inoo qabsoomey sanadkii dhammaadey, waxyaabaha aan ka xusi karana waxa ka mid ah:

- 1) Sanadkani wuxuu ahaa sanadkii ay imtixaanka u fadhiisteen ardaydii ugu badneyd ee ka soo jeeday deegaanka ay jaamacaddu ku taal



- 2) Sanadkani wuxuu ahaa sanadkii ay jaamacadda ka qalin jebiyeen ardaydii ugu badneyd oo ka kala socota kuliyadihii ugu badnaa oo laga qalin jebiyo (ilaa shan kulliyadood)

- 3) Sanadkan waxaynu ku guulaysaney in macalimiin jaamacadda ka hawl-gasha iyo

arday jaamacadda ka qalin jebiyey ay deeq waxbarasho ugu baxeen wadamada Turkiga, Ethiopia iyo Ruushka.

- 4) Sanadkani wuxuu ahaa sanadkii ay jaamacaddu soo iibsatey qalab ay practical ku sameeyaan ardayda dhigata kulliyadda caafimaadka. Sidoo kale waxa kulliyadda beeraha loo soo iibiyey buugaag qaali ah oo ay qorashkooda bixisey hay'ada Save Children International oo fadhigeedu yahay wadanka UK.

- 5) Sanadkii tagey waxa inoo suuragaley in ardayda dhigata kulliyadaha kala duwan ay sameeyeen bandhig kuliyad waliba ay kuu muujineyso awoodeeda iyo adeega ay ku soo kordhin karto deegaanka.

- 6) Sanadkan waxa inoo suuragaley ineynu soo saaro booklet laga daalacanayo magaca iyo sawirka ardaydii qalin jebisey

- 7) Sanadkan waxaynu deeq buugaag ah ka helay, hay'ada fadhigeedu yahay Minnesota loona yaqaan books for Africa, inooguna deeqdey buugaag tayo fiican leh oo gaadheysa 35 kun oo buug



- 8) Jaamacaddu waxay deeq ka heshay dowladda Turkiga oo ugu deeqday 40 kombuutar oo ah nooca ugu tayo fiican kombuyuutarada hadda la isticmaalo.

- 9) Sanadkan waxaynu soo afjerey baahidii darayd ee ka taagneyd xagga luqada Englishka, waxaana inoo suuragashay ineynu keeney macalim Master ku haysta aqoonta English iyo education ka




10) Jaamacaddu waxay sanadkan ka qayb gashay fadhigii 2 sanad laha ahaa ee daladda jaamacadaha Spain iyo Africa oo ka dhacey dalka Marocco.

11) Sanadkan jaamacaddu waxay xubin buuxda ka noqotey hay'adda climi baadhista jaamacadaha Eastern

African oo ka kooban 11 wadan shirkooduna ka dhacey Arusha, Tanzania, (Eastern African Research Innovation Management Association)

12) Sanadkii tagey jaamacaddu waxay xidhiidh la sameysey Jaamacad ku taal wadanka Hindiya oo loo yaqaan Amnity. Xidhiidhkaasi wuxuu suuragaliyey in 8 arday oo ka mid ah shaqaalaha jaamacadda iyo kuwa jaamacadda ka qalin jebiyey ay jaamacadda Amnity ka diyaariyaan darajada 2aad ee waxbarasho (Master) iyagoo tacliinta ku qaato xarunta jaamacadda Nugaal, kuna qaadanaya habka loo yaqaan E-learning, ama online education.



13) Sanadkii tagey waxa inoo qabsoomey safar hawl-wadeenada jaamacaddu ay ku tageen, dalalka North America sida Minnesota, Ohio, Ottawa, Toronto, East Africa and Emirates, halkaasna ay kula kulmeen bulsho waynta u dhalatey deegaanka jaamacaddu ku taal iyo deegaamada kale ee Somaliyeed. Halkaasna ay hawl-wadeenada jaamacaddu ku soo bandhigeen warbixinta deegaanka guud ahaan, gaar ahaan dhanka waxbarashada.

14) Waxay jaamacaddu heshiish la gashey hay'ad caalamiga ah oo loo yaqaan International Organization Immigration. Hay'adan oo ay jaamacadda iska kaashan doonaan in shaqo abuur loo sameeyo ardayda ka baxda jaamacadda Nugaal.

Higsiga sanadka aynu ku jiro

Waxyaabaha jaamacadda u qorshaysan sanadkan aynu ku jiro, waxa ka mid ah:

- 1) Kor u qaadida tayada iyo tacliinta dhanka waxbarasho iyo ka gun gaadhidda in waxbarashadu u hirgasho sidii loo qorsheeyey
- 2) In la xoojiyo waaxda cilmi baadhista iyo daraasaadka ee jaamacadda
- 3) In la joogteeyo soo saaridda journal ay ardayda iyo macalimiintuba ka wada qayb qaataan.
- 4) Tayeynta ardayda jaamacaddu waxay ku xidhan tahay tayeynta ardayda ka soo baxeysa dugsiyada sare. Sidaa daraadeed, waxa duruus muraajico ah la siiyaa ardayda dugsiyada sare ee sanadkan u fadhiisanaya imtixaanka form four ka, isla markaana waxa laga caawiyaa tusaalena laga siiyaa qaabka loo galo imtixaanada form four ka.
- 5) Sidoo kale jaamacadda waxa u qorsheysan iney wada tashi joogta ah la samayso waalidiinta, maamulka, macalimiinta iyo ardayda dugsiyada sare lagana wadatashado sidii kor loogu qaadi lahaa tayada waxbarasho ee deegaanka
- 6) Waxa sanadkan laga qalin jebinayaa 6 kulliyadood. Tirada ardayda qalin jebinaysa waa 157. Waxa wiilal ah 86 gabdhuhuna waa 71.
- 7) Jaamacaddu waxay qorsheysey tababar macalinimo loogu furayo ardayda ka baxdey machadka furqaan ee looyaqaan (ardayda midowga machadka furqaan ama Multaqaha), loona furi doono tababar macalinimo gaar ahaan maadooyinka sayniska, xisaabta, tarbiyada, computerka iyo English iwm ilaaa heer diploma and degree. Si ay uga hawl-galaan iskuulada hoose, dhexe iyo sare.
- 8) Jaamacaddu sidoo kale iyadoo kaashaneysa hay'ada UNICEF waxay tababar u furtay 15 hablood oo loo tababarayo maamulayaal iskuulada hoose dhexe.
- 9) Qorshaha jaamacadda ee sanadkan waxa ka mid ah in hawl-wadeenada jaamacaddu ay raadiyaan guri ijaar ah oo ku meel gaar ahaan loo isticmaalo library inta jaamacadda looga dhisayo library iyo madasha shirarka.
- 10) Jaamacaddu waxay ka qayb gashey 2 shir oo waawayn: a) Waa shirkii midowga Jaamacadaha Somaliyeed oo ay isgu imanayaan jaamacado ka socda inta badan gobalada Somalidu degto. b) Shirka kale waa mid ay isugu yimaadeen jaamacadaha ugu waaweyn eek u yaal wadamada Somaliya, Djabuti, Ethiopia, Kenya iyo Uganda.
- 11) Waxyaabaha jaamacadda u qorshaysan sanadkan waxa ka mid ah: Ka qayb galka shirka cilmi baadhista iyo daraasaadka oo ay ku bahoobeen 11 wadan oo ku yaal Africa (Eastern Africa Research Innovation Management Association), lana qorsheeyey inuu ka dhaco wadanka Kampala, Uganda.
- 12) Jaamacadda waxa u qorsheysan iney raadiso qaabka loo yaqaan E-Library oo arday welba u saamixi karta inuu heli karo nooca buugga uu u baahan yahay.

- 13) Waxyaabaha jaamacadda u qorsheysan sanadkan waxa ka mid ah in hawl-wadeenada jaamacaddu ay ku dadaalaan iney xidhiidh la sameeyaan hay'adaha maal gelinta ku sameeya waxbarashada si looga helo tababar aqooneed iyo mid maaliyadeed (Capacity building), labadaba.
- 14) Jaamacadda waxa u qorsheysan in sanad walba ay jaamacaddu hesho deeq waxbarasho oo la siiyo macalimiinta iyo ardaydii ka qalin jebisey jaamacadda dibna ugu soo noqdaan jaamacadda.
- 15) Higsiga jaamacadda ee sanadkan iyo kuwa soo socdaba waxa ka mid ah, horumarinta iyo balaadhinta jaamacadda sida dhamaystirka, gidaarka dhismaha cusub ee jaamacadda, library, madasha shirarka, dhismayaal cusub iwm.
- 16) Qorshaha iyo higsiga jaamacadda waxa ka mid ah in la seeso ama la daydo dhulkii ay si wadajir ah u dhagax dhigeen Alle u naxariistee Mohamed Buraale Ismail iyo Mohamed Abdi Xashi ee ku yaala dhanka galbeedka Lasanod ama qorax u dhaca Lasanod.